


Modified Fontan Procedure (Extracardiac Conduit)

Qalliinka Beddelan ee Fontan (qaabgeeseeska qulqulka dhiigga)



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
 612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
 Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Qalliiinka Beddelan ee Fontan: Qaabgeeseedka qulqulka dhiigga

Modified Fontan Procedure: Extracardiac Conduit

Qalliiinka Fontan waxa uu qeyb ka yahay qallimo taxane ah oo lagu dhammeystirayo in lagu yareeyo xanuunka wadnaha halka qalbac. Qalliiinkan waxa uu kala leexinayaar wareegga dhiigga "buluugga" ah, ee aan ogsajiinta lahayn iyo dhiigga "guduudan," ee ogsajiinta leh. Marka qalliiinka Fontan la sameeyo, dhiigga aan lahayn ogsijiinta wuxuu si qunyar ah ugu shubmayaa halbowleyaasha sambabka, ka dibna sambabka. Dhiiggu wuxuu ogsijiin ka helaa sambabada oo wuxuu ku noqdaa wadnaha, oo ka dibna wuxuu ku sii qulqulaa jirka. Qalliiinkan waxaa badanaa lagu sameeyaa ilmaha jira 2 ilaa 4 sano.

Marka la sameynayo qalliiinka, xabadka ayaa laga furayaay iyadoo laga jeexayo meel horay loo qalay, oo waxaa la isticmaalayo duleelinta qeyb dhexe. Waxaa ilmaha yar lagu xirayaad wadne iyo sambab macmal ah (mashiir ah wadne-sambab). Tuubbo ah Gore-tex® (Gore) ayaa laga soo goynayaa dherer ku habboon. Waxaa la jeexayaal halbowlaha sambabada meel u dhow tuubada ku jirta ee labada jijo ee qalliiinka Glenn (ku-xirista dhuunta dhiigga ee sambabka midige oo tuubada ayaa lagu tolayaa halbowlaha. Marka sidaas la sameeyo, dhuunta hoose ee dhiigga waxaa loo kala qeybinayaay qeybta kore. Cirifka hoose ee tuubada Gore-tex® (Gore) ayaa markaa lagu tolayaa dhuunta hoose ee dhiigga. Mararka qaarkood, xayndaab (duleel yar) ayaa ku dhext sameysmeysa tuubada iyo qeybta kore.

Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliiinka Ka-dib:

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliiinka: 4 ilaa 5 saac
- Leymanka Caadiga: Carrurta intooda badan waxay ku noqon doonaan Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliiinka iyaga oo ku tuubbo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada ama IV daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe ama IV bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecanka looga daadinayo, iyo kateetaraha Foley oo ah kan kaadidu geleyso.
- Sookabashada Caadiga ah Qalliiinka Ka-Dib: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa wax yar ka dib qalliiinka, mararka qaarkood qolka la kala gooyo. Leynka halbowlaha badanaa waxaa la saaraa dhowr maalmood ka dib qalliiinka, marka aan loo baahneyn qaar badan oo ka mid ah daawoooyinka faleebba. Tuubbada dhexe ayaa loo deynayaa ilaa inta dhiig laga qaadayo iyo si daawo looga siiyo. Tuubooyinka xabadka ayaa sii ku jira ilaa uu yaraado dheecaanka soo baxaya. Waa wax caadi u ah oo lagu arko carrurta tuubada xabadka in uu dheecaanku muddo ka soo baxo ka dib Fontan. Mararka qaarkood, tuubooyinka xabadka ayaa la gelinayaay labada dhinac ee xabadka midkood si loogu xakameeyo dheecaanka. Carrurta waxa kale oo la siin doona dawo biyaha saarta (sida Lasix) si loogu xakameeyo dheecaanka.
- Daawada dhiigga jilcisa Fontan ka dib: Wax yar ka dib qalliiinka, ilmaha waxaa la siinayaay heparin. Heparin waa daawo loo isticmaalo si looga hortago xinjirowga wareegga ee Fontan. Marka ilmuu bilaabo cuntada iyo cabitaanka, waxaa la siin doonaan Coumadin iyo aspirin ama Coumadin, daawoooyin afka laga qaato oo looga hortagayo xinjirowga dhiigga. Marka loo qoro Coumadin, International Normalized Ratio (Qiyaasta Caadi Ahaanta Caalamiga), ama INR, ayaa la raacayaa si loo hubiyo in ay sax tahay qiyaasta Coumadin ee ilmuu qaato. Heerka INR ee aadka u sarreeya waxay keeni kartaa dhiigbax kedis ah, iyo heer ah INR oo hooseeya waxa uu keeni karaa xinjir in ay sameysato. Marka aspirin loo bilaabo, ama heerka INR ee daaweynta ilmaha qaata Coumadin, heparin waa in laga joojiyo. Carrurta looga welwelayo xinjirowga lagu ogyahay, daawa la yiraahdo Lovenox ayaa loo qorayaa. Daawadan waa cirbad ah laba jeer maalintii oo laga siinayaay maqaarka hoostiisa.
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Wuxuu ilmuu isbitaalka joogayaa badanaa 7 ilaa 14 maalmood, mararka qaarkood ka dib Qalliiinka Fontan. Muddada joogista isbitaalka waxaa inta badan lagu qiyasaa inta uu qaadanayo dheecaanka tuubada xabadka in uu yaraado.

Qaadashada Daawoooyinka Guriga: Carrurta waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib qalliiinka Fontan sida:

- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin, Coumadin, Lovenox) looga hortago xinjirowga.
- Daawada biyaha saarta (Lasix, Zaroxolyn, Diuril) si looga xakameeyo dareeraha
- Walax ah dhimista culeyska si wadnaha looga yareeyo dhiigkarka yo hawsha badan (Enalapril, Captopril)